



# **Mudnaanaha Naafonimada Koritaanka ee Golaha Sharci-dejinta Gobolka ee 2023**

*La Cusbooneysiiyay 27-ka Oktoobar, 2022*

Degmada King waxay Golaha Sharci-dejinta ugu mahadcelinaysaa taageerada joogtada ah ee ay u muujiyaan carruurta leh dib-u-dhacyada ama naafonimada koritaanka, shakhsiyaadka leh naafonimada caqliga iyo koritaanka (I/DD), iyo qoysaskooda. Dedaallada sida ujeedka leh loo sameeyay ee ay wado Degmada King si ay u noqoto Degmo ka soo horjeedda cunsuriyadda ayaa waxaa ka mid ah u heellanaanta in ay udub-dhexaad ugu dhigto shaqadeeda bulshooyinka dadka naafada ah iyo Madowga, Asaliga, iyo Dadka Midabka Leh.

**Degmada King ayaa weyddiisaneysa Golaha Sharci-dejinta in ay mudnaansiiyaan horumarinta u sinnaanta helidda kheyraadka iyo bixinta adeegga, ixtiraamidda codadka bulshada iyada oo la qaadayo tallaabooyinkan soos socda sannadka 2023:**

- 1. Kordhinta maaliyadda adeegyada luuqad ahaan loo heli karo oo dhaqan ahaanna habboon.** Maalgelinta fasiraadda, tarjumo, hagd dhaqameed, iyo taageerooyinka kale ee dhaqanka iyo luuqadda si dhammaan dadka qaba I/DD iyo qoysaskoodu ugu helaan adeegyada luuqadooda iyo dhaqankooda.
- 2. Maalgelinta soo-jeedimada Daraasadda Qiimaha Maalintii iyo Shaqaaleynta ee Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington,** oo ay ka mid tahay kordhinta qiimayaasha si loo xasiliyo shabakooyinka adeeg bixiyeyaasha loona hubiyo xubnaha bulshada in ay helaan adeegyada iyo kordhinta qiimaha maamulka degmada.
- 3. Sii wanaajinta helidda iyo baabi'inta caqabadaha horyaalla taageerooyinka iyo adeegyada tayada leh ee loogu talagalay qoysaska haysta carruur yaryar (0-5) oo dib-u-dhacyo iyo naafonimo leh.** Maalgelinta dedaallada la isuduweyn ee nidaamyada oo dhan si loo taageero baahiyada carruurta iyo qoyska, oo ay ku jiraan baabi'inta kharashaadka jeebka laga bixiyo ee qoysaska ee loogu talagalay Taageerada Hore ee La Siiyo Carruurta Yaryar iyo Kuwa Socod-baradka ah.
- 4. Maalgelinta adeegyada loogu talagalay ardeyda ka baxeysa dugsiga sare.** Bixinta adeegyada Ka-tanaasulidda Aasaasiga ah ee Basic Plus ee loogu talagalay dhammaan ardeyda xaqa u leh ee Maamulka Naafada Koritaanka ee Gobolka ee ka baxay dugsiga sare sannadka 2023-2025 si loo taageero safarkooda ka-dib iskuulka.
- 5. Maalgelinta Sanduuqa Ammaanada Guryeynta iyo ilaha kale ee dakhliga si loo taageero xalalka guryeynta bulshada ku saleysan.** Maalgelinnadan ayaa loo baahan yahay si loo xaqiijiyo dadka qaba I/DD iyo qoysaskooda in ay ku noolaadaan guri la awoodi karo, ammaan ah, loo siman yahay, oo laga heli karo bulshooyinkooda degaanka.
- 6. Maalgelinta taageerooyinka caafimaadka habdhaqanka ee I/DD.** Shakhsiyaadka iyo qoysaska waxay u baahan yihiin taageerooyinka caafimaadka hab-dhaqanka oo kala duwan lana heli karo. Wax-ka-qabashada dhibaataada caafimaadka habdhaqanka ee sii kordhaya waa in ay ka mid yihiin ikhtiyaarada xog-ogaalka loo yahay, la heli karo ee dhammeystrian ee I/DD marka lagu daro adeegyada guriga ka baxsan.

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah, fadlan la xirii:

Michael White, Xafiiska Laanta Fulinta Degmada King, michwhite@kingcounty.gov / 206-206-351-1674